




adiga caafimaadkaaga adiga mustaqbalkaaga

Soo marbaaritaanka xubinta
taranka dumarka

Somali | Soomaali

tuubbada ugxanta ee isku xirta
ilmo-galeenka iyo ugxn sidha



Waa maxay afka ilmo-galeenka?

Afka ilmo galeenku waa qayb ka mid ah nidaamka taranka. Waxay ku taal dusha sare ee xubinta taranka haweenka waxayna isku xirtaa siilka iyo minka (ilmo galeenka).

Waa maxay HPV?

Fayraska 'papillomavirus' (HPV) waa fayras caadi ah oo qofba qof ugu gudbiyo xiriirka galmaada, oo ay kujirto taabashada galmaada ee istaabashada labada maqaar HPV waa sababta ugu weyn ee keenta kansarka xubinta taranka dumarka.

Waa maxay kansarka makaanka afkiisa?

Kansarka makaanka afkiisa waa cudur halis ah. **Marxaladaha hore, ma jiri karaan calaamado lagu garto.** Baarista Afka Ilmo-galeenka (The Cervical Screening Test) wuxuu banaanka keeni karaa isbeddello noqon kara kansar.

Tijaabadu waxay noqon kartaa nolol badbaadin.

Goorma ayaad u baahan tahay inaad baaritaanka sameyso?

Haddii aad 25 jir tahay ama ka weyn tahay oo aad waligaa xiriir galmo samaysay, ballan ka qabso dhakhtar ama kalkaaliso caafimaad.

Waa inaad **sameysaa Baaritaan joogto ah oo Afka ilmagaleenka ah shantii sano mar** ilaa aad ka gareyso 74. Xitaa haddii natijida baaritaankaagii ugu dambeeyay uu fiicnaa, waa inaad heshaa xusuusin si aad u ballansatid baaritaankaaga xiga.

doontaa warqad aad ku saxiixeyso oo aad kusoo celin doontid dugsigaaga haddii aad jeelaan lahayd in ilmahaaga la tallaalo. Tallalku wuxuu ka caawin doonaa ilmahaaga inuu ka badbaadiyo HPV goorta ay bilaabayaan galmaada ama ay guursanayaan.

Haddii ilmahaagu seegay tallalka dugsiga, weli way kuu heli karaan bilaash illaa 25 sano jir. Haddii aad jeelaan lahayd in lagu tallaalo adigoo qaangaar ah, weydi dhakhtarkaaga.

Haddii aad qaadataw tallalka HPV waxaad weli u baahan tahay baaritaanka afka ilmo-galeenka laga bilaabo da'da 25, maadaama uusan tallalku kaa ilaalinayn dhammaan noocyada HPV.

Talaalkani waa badbaado, ma keeno kansarka mana abuuro dhibaato dhalmo caruur.

Tijaabada baaritaanka xubinta taranka dumarka waxay noqon karaan nolol badbaadin.

Dadka uu ku dhaco kansarka ilma-mareenka badidood weligood may samayn baadhitaanka afka ilmo-galeenka ama maba aysan sameyn baadhis shantii sano ee la soo dhaafay.



Sidee loo sameeyaa baaritaanka xubinta taranka dumarka?

Waxaad heysataa laba xulasho (choices).

Waxaad qaadi kartaa saamiga (sample-kaaga), ama dhakhtarkaaga ama kalkalisada ayaa kaa qaadi kara saamigaaga. Labada xulashaba waa sax waana amaan.

Ururinta dhakhtarka/kalkalisada

Si wax kastaa gaar kuugu ahaadaan (privacy) waxaad ku dabooli kartaa maro jirkaaga inta hoose.

Dhakhtarka ama kalkalisada ayaa galinaya qalab wax lagu baaro (speculum) siilka.

Kadib waxay isticmaali doonaan buraash yar oo jilicsan si ay muunada (sample) makaanka afkiisa uga soo qaadaan oo ay u diraan shaybaadhka si loo baaro.

Markay natijjooyinka diyaar noqdaan, takhtarka ama kalkalisada ayaa kula soo xiriiri doona. Haddii kale, lasoo xiriir rugta caafimaadka si aad u ogaato natijjadaada.



Haddii lagaa codsado inaad u soo noqtid ballan, aad bay muhiim u tahay inaad timaado.

Adiga inaad iska qaadid


Dhakhtarka ama kalkalisada ayaa ku siin doonta suuf ka bacdina kuu sharxi doonta waxa aad samaynayo.

Muunadaada (sample ka) ayaad iskaga qaadi kartaa daaha gadaashiisa qolka daaweynta ama musqusha.

Ka saar suufka xirmada uu ku jiro oo geli siilka gudhiisa dhown sentimitir siilka.

Ku wareeji suufka 10 ilaa 30 ilbiriqsi, ka dibna ka saar oo dib ugu soo celi xirmada.

Waxaad caawinaad waydiisan kartaa dhakhtarkaaga ama kalkalisada wakhti kasta.



Haweenka la guday ayaga laftigooda way weydiisan karaan baaritaanka.



Sida ugu fiican ee looga hortagi karo kansarka xubinta taranka dumarka waa inaad sameysaa. Tijaabada baaritaanka xubinta taranka dumarka 5ti sanaba mar.

Halkee ayaad ka heli kartaa baaritaanka ilmo-galeenka ama xubinta taranka dumarka ee bilaashka ah?

- Rugta dhakhtarka (GP). Weydii inay "biilka dowlada ka qaataan" (lacag la'aan ay tahay)
- Xarumaha Caafimaadka Bulshada
- Rug caafimaad ee True Clinic - Brisbane, Ipswich, Toowoomba, Cairns iyo Rockhampton

La xiriir True Clinic Brisbane



07 3250 0200

clinicreception@true.org.au

true.org.au/clinic



Macluumaadkaan waxaa la sameeyay iyadoo lala kaashanayo Kooxda La-talinta Caafimaadka ee ka Falcilya Dhaqamada (Responsive Health Advisory Group) iyo wadatashi lala sameeyay bulshada.

